



HAB SOCODKA TALLAALKA COVID-19

Scott County Public Health waxay isticmaalaysaa tallalka Moderna, kaas oo u baahan labo duritaan oo ay u dhaxayso muddo 24-32 maalmood ah. Duritaanka koobaad wuxuu bilaabayaa disitaanka ilaalada. Duritaanka labaad ee dowr isbuuc kaddib ah wuxuu muhiim u yahay helitaanka ilaalada ugu badan. Ka hortagga ugu sarreeya ee cudurka COVID-19 wuxuu qaadan karaa ilaa labo isbuuc kaddib duritaanka labaad.

<p>1</p> <p>SAMAYSO BALLANTA KOOBAAD</p>	<p>2</p> <p>BALLANTA DURITAANKA KOOBAAD</p>	<p>3</p> <p>SAMAYSO BALLANTA LABAAD</p>	<p>4</p> <p>BALLANTA DURITAANKA LABAAD</p>
<p></p> <p>FIIRI IN AAD XAQ U LEEDAHAAY Eeg qadka internet-ka ama soo wactan si aad u ogaato in aad qaadan kartid tallaalka</p> <p></p> <p>SAMAYSO BALLAN Iska diiwan geli bogga Public Health: scottcountymn.gov/vaccine</p>	<p></p> <p>WAXAA LA TIMAADDAA Leesinka baabuurka, Warqadda aqoonsiga, ama warqad aqoonsi ee shaqo si loo xaqiijiyo xaq u lahaanshahaaga</p> <p></p> <p>IMAANSHAHA Imoow in aan ka badnayn 15 daqiiqo ka hor xilliga ballantaada</p>	<p></p> <p>SAMAYSO BALLAN Iska diiwan geli bogga Public Health: scottcountymn.gov/vaccine</p> <p></p> <p>SAMAYSO BALLANTA LABAAD 24-32 maalmood kadib ballanta koobaad</p>	<p></p> <p>WAXAA LA TIMAADDAA Leesinka baabuurka, Warqadda aqoonsiga, ama warqad aqoonsi ee shaqo si loo xaqiijiyo xaq u lahaanshahaaga</p> <p></p> <p>QAADO DURITAANKA LABAAD Af-xirkaaga qab, raacna taxadaraadka caafimaad</p>

Su'aalo?



Qadka tooska ah ee COVID-19: 952-818-3730

Wuxuu furanyahay Isniin - Jimce 8:00-4:30, Ku reeb farrin xilliyada sabtida iyo axadda.
English iyo Spanish



covid@co.scott.mn.us



scottcountymn.gov/vaccine





SU'AALAHHA INTA BADAN LA IS WAYDIIYO

Goorma ayay dadka dhan xaq u yeelanayaan helidda tallaalka COVID-19?

Xilligan jooga, Scott County Public Health waxay tallaalaysaa dadka deggan ee 65jir ah ama ka weyn. Waaxda Caafimaadka ee Minnesota ayaa go'aamisa gofka la tallaalayo iyo xilliga. Waxaan dadka u tallalaynaa hadba sida tallaaku noo soo gaaro. Sahayda tallaalku markay soo bataan waxaa isna badanaaya dadka fursadaha u helaya in la tallaalo. Si aad ula socotid macluumaadka fursadaha tallalka, social media-ha kala soco Scott County ama booqo website-keeda ee www.scottcountymn.gov/vaccine.

Waa meeqa qiimaha tallaalka COVID-19?

Tallaalka COVID-19 ee ay bixiso Scott County Public Health waa lacag la'aan. Dowladda federal-ka ayaa qof walba ka bixinaysa qarashka ku baxaya tallalka COVID-19. Waxaa lagu waydiin doonaa macluumaadka kaarka caafimaadka marka aad qaadanyso tallaalka, laakin taas waa si goobta aad ka qaadatay tallaalku ay uga doonato dawladda qarashka maamulidda tallaalka bixinta.

Tallaalkee COVID-19 ayeyey isticmaalaysaa Scott County Public Health?

Scott County Public Health waxay haysaa tallaalka COVID-19 ee Moderna.

Meeqa durriin ayaa loo baahanyahay si si buuxda la isaga tallaalo cudurka COVID-19?

Scott County Public Health waxay isticmaalaysaa tallalka Moderna, kaas oo u baahan labo duritaan oo u dhaxayso muddo 24-32 maalmood ah. Duritaanka koobaad wuxuu bilaabayaa disitaanka ilaalada. Duritaanka labaad ee dowlad isbuuc kaddib ah wuxuu muhiim u yahay helitaanka ilaalada ugu badan.

Sidee u samaystaa ballan si aan u qaato tallalka COVID-19?

Soo wac qadkeen tooska ah ee COVID-19 [952-818-3730](tel:952-818-3730) ama booqo boggeenna internet-ka ee scottcountymn.gov/vaccine si aad online uga samaysato ballan.

Haddi horay uu iigu dhacay cudurka COVID-19 oo aan ka caafimaaday ma u baahanay in aan is tallaalo?

Haa, waa in aad weli is tallaasho haddii uu horay kuugu dhacay COVID-19. Haddi aad qabtay COVID-19, waxaad sugtaa 90 maalmood kaddib markii uu kugu dhacay inta aadan qaadan tallaalka.

Ma qabayaa af-xir lix feet-na ma ka dheeranayaa dadka haddi aan qaatay tallalka COVID-19?

Haa, dadka tallaalka qaatay weli way ku faafin karaan COVID-19 kuwa aan qabin tallaalka.

Tallaalka COVID-19 dawladdu ma ku qasbi doontaa dadka?

Minnesota qasab ka dhigi mayso tallaalka COVID-19. Waaxaad xaq u leedahay inaad diidid iyo in aad aqbashid tallaalka COVID-19. Public Health waxay si adag kuugu dhiiri gelinaysaa qaadashada tallaalka COVID-19 si aad u badbaadisid nafsaddaada, ehelkaaga, shaqaalah caafimaadka, iyo bulshada.

Tallalku ma yahay ammaan?

Haa, tallaalku waa ammaan wuxuuna maray tijaabooyin saynis ee adag waxaan ansixisay US Food and Drug Administration.

Waxaan maqlay in qaansiir iyo xayrtiisu ay ku jiraan tallalka. Ma runbaa?

Maya. Tallaalka COVID-19 ma lahan qaansiir, xayrtiisa (Gelatin), ama wax kale ee xoolo ka yimid.

Meega ayeyey qaadataa in tallalku si buuxda u howl galo?

Ka hortagga ugu sarreeya ee cudurka COVID-19 wuxuu qaadan karaa ilaa labo isbuuc kaddib duritaanka labaad.